



**Qetbta 4aad: Wax-u-qabashada Barakacayaasha La-soo-khasbey ee  
Magaalooyinka ee Wejiga Labaad ee Mashruuca Nagaad  
/ the Somalia Urban Resilience Project Phase II (SURP-II)**

**Nuxurka**  
**QORSHAHA MAAREYNTA DEEGAANKA IYO BULSHADA /**  
***Summary of***  
***ENVIRONMENTAL AND SOCIAL MANAGEMENT***  
***PLAN***

**Dhisidda 4 ceel-riig**  
**Dhisidda 80 dar-biyood oo ay bulshadu biyo ka dhaansato**  
**Dhisidda 600 musqulood oo laba-laba u mataanan oo loo kala soocay lab iyo**  
**dhedig**  
**Dhisidda 7 xarumood- macluumaad**  
**Gelinta 7 km oo dhuumaha biyaha ah**  
**Dayactiridda xarun caafimaad**  
**Qodista 500 godadka qashinka oo heer qoys ah**  
**Waxqabadyo baaxaddoodu yar tahay oo lagu kobcinayo goobta (yareynta haliska**  
**daadka)**

**Degmada Dayniile (Aagagga 2aad, 4aad & 5aad) & Degmada**  
**Kaxda**

**MAAMULKA GOBOLKA BANAADIR**  
**SOOMAALIYA**

**10 Juun 2023**

**Waxaa diyaarisey hay'adda IOM**

## Hordhac

Qaybta 4aad 'Wax-u-qabashada Barakacayaasha La-soo-khasbey ee Magaalooyinka ee Wejiga II ee Mashruuca Nagaad *the Somalia Urban Resilience Project – Phase II (SURP-II)* iyo Dowladda Dhexe ayaa maalgeliya hawlaha wax looga qabanayo abaarta ee la ansaxiyey ee laga fulinayo saddexda magaalo ee kala ah Muqdisho, Baydhabo, iyo Garoowe ee ay u badan tahay in ay soo gaaraan barokacayaal tiro badan oo ka soo qaxay abaarta. Waxaa taageero la siin doonaa adeegyo badan oo aasaasi ah oo la xiriira (i) fayadhowrka iyo nadaafadda biyaha (WASH), (ii) caafimaadka (iii) guriyeyn, dhul iyo hanti/*housing, land and property* (HLP) oo ay helaan barakacayaasha, taas oo looga danleeyahay sii-xoojinta hawlaha ay dowladdu wax kaga qabaneyso abaarta. Fulinta waxqabadyada waxaa hoggaamin doonta Hay'adda Socdaalka Adduunka/*the International Organization for Migration (IOM)* oo ay iskaashanayaan la-hawlgalayaasheeda ka tirsan daladda Danwadaag *Consortium*, oo ka kooban hay'adaha *the Norwegian Refugee Council (NRC)*, *Concern Worldwide (CWW)* iyo Gargaar *Relief and Development Organization (GREDO)*. Iyada oo waxqabadyada CERC loo fulinayo qaab kale si loo hubiyo in la fuliyo waqtigii loo baahnaa, haddana IOM ayaa si dhow isugu duweysa qabanqaabooyinka hay'adeed ee SURP-II ee hadda jira. IOM ayaa Heshiis Natijjo Sugan Xambaarsan la saxiixatey Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib-u-dhiska & Guriyeynta ee heer federaal, oo ka mas'uul ah korjoogteynta iyo kormeerka guud ahaan waxqabadyada CERC, halka Unugyada Hirgelinta mashruuca ee heer dowlad-hoose/*the municipality-level Project Implementation Units (PIUs)* ay dusha kala soconayaan hawl-maalmeedyada heer magaalo ee ay hirgelinayaan IOM iyo la-hawlgalayaasheeda.



**Qorshaha Maareynta Deegaanka iyo Bulshada ee Goobaha Maamulka Gobolka Banaadir.** Shuruucda Guud ee Bankiga Adduunka ee Maareynta Deegaanka iyo Bulshada / *The Environmental and Social Management Framework (ESMF)* ee ku gaarka ah waxqabadyada Qaybta 4aad<sup>1</sup> ayaa loo diyaariyey si wax looga qabto halisaha ku soo fool leh Deegaanka & Bulshada (*E&S risks*) iyo raadadka ka dhalanaya waxqabadyada Qaybta 4aad<sup>2</sup>. Sida ay dhigayso Hagidda Bankiga Adduunka (Oktoobar 2017), Qaybta 4aad ee ESMF waxaa ay intii suuragal ah wax ku dhisaysaa shuruucda guud ee Deegaanka & Bulshada (E&S) ee SURP II ee hadda jira. Inkasta oo Qaybta 4aad ee ESMF iyo ESMP-yada gaarka ku ah goob gaar ah ee ay tahay in loo diyaariyo waxqabadyo la xiriira hawlaha wax-dhisidda (*civil works*) **loo nidaamiyey in intii suuragal ah ay ahaadaan kuwo kooban oo loogu talogaley tallaabo-qaadis si ay wax uga qabtaan xaalado degdeg ah oo waqtigu hayo**, waa in lala akhriyaa shuruucda Deegaanka & Bulshada (E&S) ee hadda jira ee SURP II, oo bixinaya macluumaadka waqtigaa la joogo la hayo ee u habboon ee deegaanka iyo bulshada, qaababka guud ee sharci iyo hay'adeed, ee u habboon Jaangooyooyinka iyo dhabbe-tuseyaasha Deegaanka & Bulshada ee Bankiga Adduunka iyo lafagurista waxyaabaha dad ka dhimman. Sida horey loogu soo sheegey Qaybta 4aad ee ESMF, ESMP-gan loogu talogaley goobaha ay deggan yihiin barakacayaasha ee Maamulka Gobolka Banaadir waxaa loo diyaariyey in looga shaqeeyo waxqabadyada la halmaala hawlaha dhismaha 4 ceel-riig, 80 dar-biyood oo bulshadu ka dhaansato, 600 musqulood oo u kala soocan lab iyo dhedig oo la soo xiran karo, 7 goob-macluumaad, dhigista dhuumaha biyaha keena oo dhererkoodu gaarayo 7km iyo dayactiridda goob caafimaad, qodista 500 godadka qashinka ee heer qoys ah iyo waxqabyo baaxaddoodu yar tahay oo lagu kobcinayo goobta (sida yareynta halista daadadka), oo laga fulinayo degmada Dayniile (Aagagga 2aad, 4aad & 5aad) & degmada Kaxda.

## Goobta Mashruuc-hoosaadka

### Degmada Dayniile (Aagagga 2aad, 4aad & 5aad) & Degmada Kaxda ee Maamulka Gobolka Banaadir

<sup>1</sup> IOM, Shuruucda Guud ee Maareynta iyo Bulshada/*Environmental and Social Management Framework (ESMF)* ee Qaybta 4aad ee SURP-II: Wax-ka-qabshada Dadka Magaalooyinka Khasabka looga Soo Barakiciyey', November 2022

<sup>2</sup> Maalgelintii Dheeriga Ahayd ee Labaad/*The Second Additional Financing* ee SURP II ayaa la-ansaxiyey Disembar 2022, taas oo CERC-ESMF dib loogu wanqaley magaca "*the ESMF for Component 4: Response to Urban Forced Displacement*" oo wax laga beddeley si ay u soo hoos gasho Maalgelinta Dheeriga ah ee Labaad.



Source: IOM Oct. 2022

Maamulka Gobolka Banaadir waxaa ku nool barakacayaasha ugu tiro badan, oo lagu qiyaasey in ka badan 850,000,<sup>3</sup> waxaana la filayaa in ay 275,730 qof ku sugan yihiin heerka 4aad ee IPC (“xaaladda degdegga ah”), taas oo ah tirada ugu badan ee guud ahaan dalka si ay dhigeeyso saadaashii ugu dambeysey ee FEWSNET laga soo bilaabo bishii Sebtembar 2022. Sida ay dhigeeyso daraasadda ay dowladdu ku sameysey baahiya jira, goobaha horeyba ay dadku ciriiriga isku qabeen oo ayna ku yaraayeen adeegyada aasaasiga ah sida cuntada, hoyga iyo biyaha iyo fayadhowrka ayaa sidoo kale barakacayaashu ay ku soo wajaheen in ay dhulka ay deggan yihiin ay ka kicinayaan shakhsiyaadkii lahaa.<sup>4</sup> In ka badan 42,000 barakace ayaa degdeg ugu baahan biyo; waxaana carruur 50 ah oo ku nool Degmooyinka Dayniile iyo Kaxda looga shaki qabaa in ay ku dhacdey jadeeco waxaana la soo sheegey in ay cudurkaa u dhinteen qaar ka mid ah barakayaasha cusub.<sup>5</sup> Marka lagu xisaabtamo tirada barakacayaasha abaartu soo barakicisey ee dhowaan yimid iyo ba’naanta baahiyaha ka jira Maamulka Gobolka Banaadir, waxqabadyadan la soo jeedinayo waxaa ay diiradda saari doonaan 3<sup>da</sup> aag (zone) ee ku yaalla degmada Dayniile ee lagu calaamadiyey jaantuska hoose (Zone 2, 4 iyo 5) iyo degmada Kaxda. Habkan ku saleysan degaanka ayaa ka faa’iideysanaya raadadka hawlgal ee wada-hawlgalayaasha Danwadaag ay wadaan waxaana uu baritaari doonaa maaliyadaha kale e bani’aadamnimada sida ECHO.

## Nakh-shadda Mashruuc-hoosaadka

**Marxaladda nakh-shadeynta** waxaa ka mid ahaan doona waxqabadyadan soo socda:

- *Sahaminta biyaha*
- *Nakh-shadeynta xarunta caafimaadka ee Weydow*
- *Nakh-shadeynta Ceel-riigyada*
- *Nakh-shadeynta dhuumaha biyaha*
- *Nakh-shadeynta dararka biyaha*

<sup>3</sup> Amnesty International. 2020 “Somalia: Internally Displaced People Surviving by ‘the Grace of God’ amidst COVID-19.”

<sup>4</sup> The Government of Somalia, Contingency Emergency Response Implementation Plan – CERIP, Somalia Drought Displacement Impact Response, March 22. Bishii Febraayo barakayaal ka badan 500 ayaa laga soo saarey laba degsiimo oo ku yaalla degaanka Bangala ee Dayniile, ka dib markii uu waqtigiisu dhacay heshiiskii ay ku degganaayeen dhul ay cid gaar ah lahayd; waxaana qofka leh dhulka uu ku amrey 2,700 barakace in ay ka baxaan degsiimooyinka Maandeeq, Balanbaalis iyo Wardheere oo ku yaalla Xaafadda Saddexaad ee Degmada Kaxda. Isha macluumaadka laga heley: NRC eviction tracker.

<sup>5</sup> The Government of Somalia, Contingency Emergency Response Implementation Plan – CERIP, Somalia Drought Displacement Impact Response, March 22.

- *Nakh-shadeynta musqulaha*
- *Nakh-shadeynta Xarumaha Macluumaadka*

**Marxaladda Dhismaha** waxaa ka mid ahaan doona waxqabadyadan soo socda:

- *Dayactiridda Xarunta Caafimaadka ee Weydow*
- *Dhisidda (qodista) ceel-riiqyada*
- *Dhiqista Dhumaha Biyaha (biyo-qelinta)*
- *Dhisidda dararka biyaha laga dhaansado*
- *Dhisidda musqulaha*
- *Qodista godadka qashinka oo heer qoys ah*
- *Waxqabadyada baaxaddoodu yar tahay oo lagu kobcinayo goobta*

## Qorshaha Maareynta Deegaanka iyo Bulshada

Waxaa la diyaariyey tallaabooyin lagu khafiifinayo halista iyo saameynta gurraacan ee ku imaan karta deegaanka iyo bulshada taas oo badanaa ka dhalata guud ahaan hawlaha dhismaha hoos imaanaya mashruuc-hoosaadkan, oo ay ka mid yihiin kuwa ku gaarka ah dhisidda musqulaha. Tallaabooyinka khafiifinta dhibaata waxaa ay la halmaalaan buuqa iyo jabaqda kale, halisaha dab kaca, wasakhowga hawada, wasakhowga biyaha, wasakhowga carrada, baaba'idda dhirta iyo xawayaanka, maareynta wasakhda, caafimaadka iyo bedqabka xirfadeed, Galmada Ka-faa'iideysiga ah iyo Xadgudubka ah/*Sexual Exploitations and Abuse (SEA)*, iyo amniga.

## Habraacyada Maareynta Shaqaalaha

Habraacyada Maareynta Shaqaalaha / *The Labor Management Procedures (LMP)* ee SURP II (ee la cusbooneysiisay Abriil 2022) ayaa ay tahay in lagu saleeyo waxqabadyada CERC. Qaybtan waxaa ay soo koobeysaa waxyaabaha ugu muhiimsan ee la halmaala shaqaalaha ee ay waajibinayaan Habraacyada Maareynta Shaqaalaha, kuwaas oo muujinaya waxyaabaha ugu muhiimsan ee lagu khafiifinayo halisaha shaqaalaha ee u habboon waxqabadyada mashruuc-hoosaadka.

**Da'da ugu yar ee shaqaalaha mashruuca.** Inkasta oo barakacayaasha iyo bulshada martigelisey ay ka mid noqonayaan shaqaalaha mashruuca ee qabanaya hawlaha dhismaha, haddana siyaasadahan iyo habraacyadan soo socda ayaa loo adeegsanayaa maareynta halis loo galo in carruur lagu shaqeysto.

- **Shaqo khatar leh:** Sida ay qorayaan shuruudaha ay u dhigeen dowladda iyo Bankiga Adduunka, da'da ugu yar ee loo oggol yahay in ay qabtaan shaqo khatar ah (dhisme) oo ka mid ah waxqabadyada mashruuc-hoosaadku waa 18 sano jir.
- **Qaabka lagu xaqiijinayo da'da:** Si looga hortago in la shaqaaleeyo carruur da' yar, waa in dhammaan qandaraasyada shaqada ee lala gelayo qandaraaslayaasha ay ku jiraan qodobbo ku waajibinaya in ay u hoggaansamaan shuruudaha u dhigan da'da ugu yar ee qof lagu shaqaaleyn karo, waana in ay ku caddahay ciqaabta ay mudaneyso cidda u hoggaansami weyda sharcigaas, waxaana si wanaagsan loogu wargelin doonaa dhammaan daneeyayaasha suuragalka ah oo ay ka mid tahay bulshada degaanka ee shaqaalaha xirfadda leh laga soo qaadan doono.
- **Tallaabooyin sixitaan oo mas'uuliyadi ay ku dheehan tahay.** Haddii qof aan buuxin shuruuddii da'da ugu yar ee la oggol yahay uu ka shaqeynayo mashruuca, markaa waa in loo-shaqeeyaha (qandaraaslaha, cidda qaadatey qandaraas-hoosaadka ama ka mid ah kuwa ugu waaweyn ee agabka keena) lagu waajibiyo in uu qofkaa u shaqeynaya mashruuca uu shaqada uga joojiyo si mas'uuliyadi ay ku dheehan tahay.

## 4. La-shaqeynta Daneeyeyaasha

**Wada-tashiyada daneeyeyaasha goobta Maamulka Gobolka Banaadir:** Wada-tashiyo daneeyeyaala oo la xiriira waxqabadyada qorsheysan ayaa lala yeeshay daneeyeyaala kala duwan. Ka-qaybgalayaal wadartoodu tahay 96 oo bulshada qaybaheeda laga soo kala xuley ayaa lagu beegsadey lixda aag (zones) - (aagga 1aad, 2aad, 4aad iyo 5aad ee Dayniile iyo aagga 6aad iyo 7aad ee Kaxda). Kooxda Haweenka: 30 (Dayniile 20 iyo Kaxda: 10); Kooxda ragga: 30 (Dayniile: 20 iyo Kaxda:10); Kooxda Dhallinyarada: 30 (Dayniile: 20 iyo Kaxda: 10); hoggaamiyeyaasha Xerada Barakacayaasha: 6 (Dayniile: 4 iyo Kaxda: 2); ka-qaybgalayaal ka socda wada-hawlgalayaasha NGO-yada: 16; iyo, xubno ka socda dowladda: 15, oo heer degmo iyo heer gobolba isugu jira ayaa lala tashadey.

**Habka Wax-ka-qabashada Cabashooyinka/Grievance Redress Mechanism (GRM):** Barakacayaasha iyo bulshooyinka martigeliyey ayaa inta ay socdaan waxqabadyada la tacaamulidda bulshada lagu wargelin doonaa geeddi-socodka wax-ka-qabashada cabashooyinka.

**Habka Wax-ka-qabashada Cabashooyinka ee SURP-II:** Habka Wax-ka-qabashada Cabashooyinka ee Mashruucani uu hadda leeyahay waa nidaam cabasho-soo-gudbin oo saddex heer ka kooban. Marka laga soo tago in uu qofku si toos ah u sheego cabashadiisa, qaababka kale ee uu u soo gudbin karo waa: in uu email ugu soo diro: [xalinta.cabashada@gmail.com](mailto:xalinta.cabashada@gmail.com) iyo in uu soo waco lambarka lacag la'aanta lagu soo wici karo ee Muqdisho oo ah 2323.

- **GRM heer degmo ah (Heerka 1aad ee GRM):** Guddi wax ka qabta cabashooyinka ayaa laga dhisey degmooyinka Kaxda iyo Dayniile waxaana uu ka kooban yahay wakiillo ka kala socda ururrada haweenka iyo dhallinyarada, odeyaal, culimo, wakiillo ka socda PAPs, iyo wakiillo ka socda maamulka dowladda hoose. Habku waxaa uu tixgelin siinayaa hab-dhaqannada degaanka ka jira.
- **GRM heer Dowlad-hoose ah (Heerka 2aad ee GRM):** GRM heer Dowlad-hoose ah ayaa horeyba uu u lahaa SURP-II. Waxaa uu wax ka qabtaa cabashooyinka aan lagu soo xallin GRM heer degmo. GRC heer dowlad-hoose waxaa uu ka kooban yahay wakiillo ka kala socda mid kasta oo ka mid ah demooyinka iyo Unugga Fulinta Mashruuca/Project Implementation Unit (PIU) iyo wakiillo ka socda shakhiyaadka/bulshooyinka dhibta sheeganaya.
- **GMR heer Federaal ah (Heerka 3aad ee GRM):** GMR-ka heerka federaalka ah ee hadda jira waxaa uu wax ka qabtaa cabashooyinka aan lagu xallin heerka dowlad-hoose, oo laga yaabo in ay u baahan yihiin xal heerkiiisu sarreeyo ama ah arrimo guud oo ka wada jira dhammaan dowladaha hoose ee qaybta ka ah waxqabadyada Qaybta 4aad. GRC-ga heerka federaalka ah waxaa uu ka kooban yahay Unugga isuduwidda Mashruuca/the Project Coordination Unit (PCU) ee Wasaaradda Hawlaha Guud, wakiillo ka kala socda dowladaha hoose ee u habboon, iyo wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee heer federaal ee u habboon.

**GRM-ka IOM.** IOM waxaa ay adeegsanaysay habka ay hay'adda IOM ay La xisaabtamaan Dadka ay Dhibaataadu Saameysey ee loo yaqaanno 'Accountability to Affected Persons (AAP)'. Isla habkan ayaa sidoo kale lagu maamuli doonaa hawsha ay qabtaan la hawlgalayaasha ay IOM iskaashadaan ee NoFYI, iyo SCC. Habka AAP waxaa uu ku saleysan yahay (b) ka-qaybgal, (t) habka soo-cabashada iyo jawaab-celinta (*complaints and feedback mechanism* (CFM), iyo (j) macluumaad-wadaagista iyo daahfurnaanta. Habka AAP waxaa ka mid ah qaab GRM ah oo loo maareeyo cabashooyinka, sidoo kale waxaa uu leeyahay qaab ay bulshadu qayb uga qaadato qorsheynta iyo hirgelinta waxqabadyada iyo qaab bulshadu ay kaga faallooto waxqabadyada oo ayna ku biiriso aqoonteeda. Inkasta oo GRM-ka hadda ka mid ah SURP II uusan gaarsiisneyn sidii ugu wanaagsaneyd (gaar ahaan Heerka-1aad ee GRM/Tier-1 GRM), haddana Qaybta 4aad ayaa saamaxaysa in la sii wado GRM-ka IOM isaga oo ah



habka heerka 1aad (*Tier 1 mechanism*). Haseyeeshee, IOM ayaa diyaarey GRC cusub, oo ka kooban wakiillada maamullada hoose ee barakacayaasha, iyo Wakiillada Dhexe ee loo yaqaanno CFM *Focal Points* si loo hubiyo in wax-ka-qabashada cabashooyinka IOM ay ahaato mid loo dhan yahay. Dhinaca kale tallaabooyinka GRM-ka ee IOM ayaa sidooda u socon doona.

## Korjoogteyn iyo Ka-soo-warbixin

Unugga Fulinta Mashruuca (PIU-ga) ayaa sameyn doono waxqabadyo korjoogteyn ah, oo ay ka mid yihiin tallaabooyinka khafiifinta halista deegaanka iyo bulshada iyo u-hoggaansamidda ESMP iyo tilmaamayaasheeda. Dib-u-eegista dokumenti-gareynta iyo korjoogteynta hawsha gudaha ka socota ayaa bil walba la qaban doonaa. PIU-gu waxaa uu warbixinta uu ku soo ogaadey korjoogteynta iyo natiijooyinkaba u soo gudbin doonaa Unugga Isuduwidda Mashruuca (PCU). Meelaha aan loo hoggaansamin, PIU waxaa uu IOM ka codsanayaa in ay qaaddo tallaabooyin sixitaan ah oo waxqabadyada dib loogu soo celinayo tubtii toosnayd ee ahayd u hoggaansamidda sharciga.

## Doorarka iyo mas'uuliyadaha la xiriira hirgelinta & kormeeridda ESMP

**Qabanqaabada guud ee hay'adeed:** Waxqabadyada Qaybta 4aad ee la soo jeedinayo waxaa hirgelintoodu soo hoos geli doontaa dalladda guud ee qabanqaabooyinka hay'adeed ee SURP-II. PCU-ga SURP-II, oo qayb ka ah Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guriyeynta / *the Ministry of Public Works Reconstruction and Housing* (MoPW) ee heer federaal ayaa leh mas'uuliyadda guud ee korjoogteynta iyo kormeeridda dhammaan waxqabadyada Qaybta 4aad, oo ay ka mid tahay maareynta halista deegaan iyo bulsho. Unugga Hirgelinta Mashruuca/*the Project Implementation Unit* (PCU) ee Maamulka Gobolka Banaadir ayaa taageeri doona kormeerka iyo korjoogteynta maalinlaha ah ee la xiriira sida loogu hoggaansamayo dhammaan tallaabooyinka khafiifinta halista ee mashruuc-hoosaadkan aan gacanta ku hayno. PCU-ga iyo PIU-ga ayaa sidoo kale hawsha kala shaqeyn doona Wasaaradda Arrimaha Bani'aadamnimada iyo Maareynta Aafooyinka (MoHADM) iyo Unugyada Xalalka Waara ee SWS dhexdeeda iyo guddiga wasaaradaha ka dhexeeya ee Dowlad-goboleedyada ee SURP II.

**PIU-ga Maamulka Gobolka Banaadir** ayaa yeelan doona mas'uuliyadda guud ee u-hoggaansamidda sharcigan u dhigan Deegaanka & Bulshada, iyo korjoogteynta sida waxqabadyada mashruuc-hoosaadku u waafaqsan yihiin dhabbe-tuseyaashii loo dejiyey. Si waafaqsan hannaanka warbixinnada IOM, NoFYL, SCC iyo CONCERN ayaa hay'addu waxaa ay diyaarin doonta warbixinno bille/saddex-biloodle/lix-biloodle ah oo la xiriira horumarka la xaqiijiyey kuwaas oo loo diyaarinayo Bankiga.

**IOM:** Waxqabadyada WASH ee labada degmo waxaa hirgelin doona qandaraasle. PCU ayaa heshiis wax-soo-saar la gashey IOM si ay u fuliso dhammaan waxqabadyada Qaybta 4aad. Halka waxqabadyada baaxadda yar ee maareynta goobta ay hirgelin doonaan NoFYL & SCC oo gacan ka helaya shaqaale ka tirsan bulshada degaanka, dhammaan waxqabadyada kale ee dhismaha waxaa fulin doonta sharikad degaanka laga leeyahay oo ay qandaraas ku siiyeen IOM, NoFYL & SCC. NoFYL iyo SCC ayaa mas'uuliyaddeeda qaadi doona: Maareynta qandaraaslaha hirgelinaya ESMP-gan, oo ay ku jiraan dib-u-eegista iyo ansaxinta ESMP qandaraaslaha, si waafaqsan sida uu ku taliyey PIU-ga; Maareynta shaqaalaha bulshada ee tooska loo soo shaqaaleeyey taas oo ay soo hoosgelayaan mas'uuliyadaha la xiriira EHS; kala-shaqeynta hay'adaha kala duwan ee Dowladda arrimaha la xiriira Deegaanka & Bulshada; si joogto ah ula tacaamulista daneeyayaasha muhiimka ah oo ay ka mid yihiin barakacayaasha, NGO-yada u habboon iyo kooxaha bulshada degaanka; abuurista wada-hadallo lala yeesho bulshooyinka ay dhibaataadu saameysey iyo hubinta in la dhexgeliyo welwelka ay qabto bulshada lana hirgeliyo talooyinka; hubinta waxqabadka mashruuca marka laga eego ilaalinta deegaanka & bulshada; in warbixin saddex-biloodle ah oo ku saabsan tallaabooyinka iyo dhacdooyinka Deegaanka iyo Bulshada la xiriira oo la siiyo PIU-ga; warbixinno aan rasmi ahayn oo bille ah oo la siiyo

PIU-ga; in dhacdooyinka culus oo 24 saac gudahooda loogu soo wargeliyo PIU-ga iyada oo lana ogeysiinayo Bankiga Adduunka.

**CONCERN:** Waxqabayada caafimaadka la xiriira ee labada degmo waxaa hirgelin doona CONCERN iyo qandaraasle. PCU-ga ayaa heshiis ku saabsan hawsha ay tahay in la qabto IOM kula saxiixdey hirgelinta dhammaan waxqabadyada ESMP-gan, oo ay ka mid yiin dib-u-eegista iyo ansaxinta ESMP-ga qandaraaslaha, si waafaqsan sida uu farayo PIU-ga; Maareynta shaqaalaha bulshada ee tooska loo soo shaqaaleeyey taas oo ay soo hoos-gelayaan mas'uuliyada la xiriira EHS; kala-shaqeynta hay'adaha kala duwan ee Dowladda arrimaha la xiriira Deegaanka & Bulshada; si joogto ah ula tacaamulista daneeyeyaasha muhiimka ah oo ay ka mid yihiin barakacayaasha, NGO-yada u habboon iyo kooxaha bulshada degaanka; abuurista wada-hadallo lala yeesho bulshooyinka ay dhibaataadu saameysey iyo hubinta in la dhexgeliyo welwelka ay qabto bulshada lana hirgeliyo talooyinka; hubinta waxqabadka mashruuca marka laga eego ilaalinta deegaanka & bulshada; in warbixin saddex-biloodle ah oo ku saabsan tallaabooyinka iyo dhacdooyinka Deegaanka iyo Bulshada la xiriira oo la siiyo PIU-ga; warbixinno aan rasmi ahayn oo bille ah oo la siiyo PIU-ga; in dhacdooyinka culus 24 saac gudahooda loogu soo wargeliyo PIU-ga iyada oo lana ogeysiinayo Bankiga Adduunka.